

Magaalada San Diego COVID-19 Guri ka Saarida Kiraystayaasha oo xayiraad ku meel gaar ah laga soo saaray

Si loo kaalmeeyo bulshada San Diego ee dhibaatooyinka dhaqaale ka soo gaartay saameeynta cudurka COVID-19, Bishan Maarso 25 keedii, 2020ka, Guddoonka Magaaladan San Diego waxay meel mariyeen xayiraad ku meel gaar ah oo ku saabsan in kiraystayaasha guryaha aan looga saarin arin la xiriirta cudurka COVID-19.

Tani micnaheedu waa mulkiilaha gurgu kama saari karo guriga haddii kiraystuhu uu awoodi waayo in uu kirada bixiyo laga bilaabo 12kii bisha maarso 2020, iyo wixii ka dambeeyey, haddii sababta uu kiraystuhu kirada u bixin waayey ay tahay dhaqaale xumo uu sababay cudurka COVID-19

Xayiraadan ku meel gaarka ah waxay ku egtahay illaa 31ka Maajo, 2020, Haddii aysan Guddoonka Magaaladu kordhinin wakhtiga xayiraada.

Shuruudaha Kiraystaha looga baahanyahay

- Kiraystuhu waa inuu ogeysiis qoraal ah siiyo mulkiilaha guriga oo ah in uusan awoodin inuu kirada bixiyo wakhtigii ku haboonaa, hoos u dhac dhaqaale oo uu sababay cudurka COVID-19 awgeed. (E-mailka iyo fariinta taleefanaka (text) waa lagu diri karaa ogeysiiska qoraalka ah)
- Ogeysiiskan qoraalka ah waa in mulkiilaha guriga la siiyo maalinta am ka hor taariikhda kirada la bixiyo.
- Toddobaad gudihiis marka ogeysiiska la siiyo mulkiilaha, kiraystuhu waa in uu mulkiilaha u keeno dukumenti caddeeynaya ama xogo la xaqiijin karo oo tusayo in kiraystuhu uu san kirada iska bixin karin sababtoo ah saameeynta dhaqaale ee cudurka COVID-19
- Haddi kiraystuhu toddobaad gudihiis uu keeni waayo dukumentiga/xogta looga baahanyahay, Mulkiiluhu in uu talaabo uu xaqiisa ku raadsanayo qaado waxaa u ogolaanayo sharciga gobolka iyo kan deegaanka.

Haddii qofka guriga kiraystay uu guuro inta ay socoto xayiraada guri ka saarida ee ay Guddoonka Magaalada San Diego meel mariyeen, qofka guriga kiraystay waa inuu bixiyo kirada lagu leeyahay oo dhan, haddii uusan jirin qaab kale oo ku xusan heshiiska (Lease) oo kirada loo maareeynayo.

- Kiraystayaasha ay Gudoonka Magaalada San Diego ka illaalinayaan in guryaha laga saaro waxay haystaan illaa Lix bilood laga bilaabo taariikhdiis ay dhaqan gashay xayiraada guri ka saarida kiraystaha ee Gudoonka San Diego soo saareen ama uu ka noqdo go'aankii fulinta ee uu soo saaray gudoomiyaha gobolka California, Newsom. Hadba kii soo hormaro.
- Haddii uu dhammaado wakhtiga xeerkan xayiraada guri ka saarida, waxaa kiraystaha waajib ku ah inuu iska bixiyo kiradiis ama ijaarkii lagu lahaa oo dhan, macnuhu waa xeerkan xayiraadu kaama saamixin bixinta kirada.

Tusaalayaasha saameeynta maaliyadeed ee cudurka COVID-19

Saameeynta maaliyadeed waxaa sababi kara Cudurka COVID-19 ama Amar dawlada ka soo baxay oo ku saabsan cudurkaa, sida amarada hay'adaha caafimaadka dadweynaya. Saameeyntan waxaa ka mid ah:

- Hoos u dhac ku yimaado dakhliga qoyska (hoyga kiraystaha) ama dakhliga ganacsiga sababtuna ay tahay ganacsigii oo xirmay.
- Kiraystaha oo shaqo la'aan ku dhacdo ama saacadihii shaqada oo la yareeyo.
- Kharashyo caafimaad oo jeebka laga bixiyo

Xuquuqda Kiraystaha

Kiraystayaasha qabo su'aalo ku saabsan xuquuqdooda sharciyeed ama ay jiraan falal socda oo guriga looga saarayo waxay soo wici karaan:

- Legal Aid Society of San Diego 877-534-2524
- Tenants Legal Center (858) 571-7100

Amarka ay soo saareen Golaha Magaalada ayaa dhigaya in ilaalinta qawaaniinta ay bixiso loo isticmaali karo difaac adag oo ku saabsan ficil kasta oo sharci darro ah oo mulkiilaha isku dayi karo inuu ka saaro kiraystaha